Grenfell Tower Memorial Commission

# Habraaca xulashada kooxda naqshadaynta caalamiga ah

Wajiga 1 Naqshadayn Kooban

10 Luuliyo 2024

## Tusmada


Warqad hordhac ah oo ka timid Grenfell Tower Memorial Commission

Bayaanka furitaanka

1 Hordhaca habraaca xulashada

2 Himilada Goobta Xuska

3 Goobta Xusitaanka iyo agagaarka

4 Bulshada Grenfell

5 Mabaadi'da hagaya naqshadaynta

6 Kooxdaada naqshadaynta


**Tusmada Tixraaca ah**


A1 Qorshaha Goobta Xusitaanka
A2 Sawirka Laga Qaada Hawada Sare ee Goobta Xuska
A3 Sawirka ee Goobta Xuska iyo Sawirada Goobta


Qoraalkan naqshadeynta waa in sidoo kale lala akhriyaa:

Su'aalaha Xog-aruurinta ee Xulashada Heerka (SSQ)
Dhukumiintiga Sharaxaada Heerka Sare (HDD)

## Warqad hordhac ah oo ka timid Grenfell Tower Memorial Commission

Daabacaada nashqadan kooban waxay ka dhigan tahay bilaabitaanka habka lagu helo oo loo magacaabo kooxda naqshadaynta goobta xuska ee takhasuska leh, tixgalinta leh oo bulshada diirada saaraya. Tani waa talaabo muhiim ah oo safarkeena ah si aan u abuurno xusuus ku haboon in lagu xasuusto kuwii naftooda ku waayay, iyo kuwa ay noloshooda waligood badaleen, dabkii Grenfell Tower ee aadka u darnaa. Waxaa naga go'an inaan hagano habraaca anaga oo ka wakiil ah buslhada Grenfell si aan u abuurno xusuus muhiim ah, milicsi leh oo saamayn leh. Goobta xuska waxay astaynay doontaa munaasabadaha naxdinta leh ee 14 Juun 2017 waxayna muujin doontaa jacaylka aan u qabno kuwa aan ku waynay oo aan waligood xasuusan doono.

Waxaan ognahay in midani ay adkaan doonto in la gaaro maadaama musiibada ay kicisay shucuur badan oo qalafsan oo xanuun badan elh. Marxaladan, ma filayno in habraacani uu dooran doono soo jeedin go'an ama naqshadayn kama dambays ah. Waa muhiim in la helo koox leh dadka ugu fiican kuwaas oo qaadan kara habka naqshadaynta xasaasiga ah iyo dhiirigelinta, oo kala shaqeeya bulshada Grenfell si loo horumariyo fikrada hore ee xusitaanka.

Bishii Maayo 2022 iyo Noofeembar 2023, waxaan daabacnay warbixinadeenii koowaad iyo labaad ***Remembering Grenfell: our journey so far***[1] iyo ***Remembering Grenfell: Recommendations and next steps to a memorial***[2]***.*** Warbixinadayadu waxay ku qeexeen shaqada aan la qabanay bulshada Grenfell ilaa hadda ee samaynta guud ee goobta xuska. Waxay kamid ahaayeen aragtida bulshada ee goobta xuska, maamulkeeda mustaqbalka iyo habraaca socda ee lagu xasuusanayo waxa bulshadeenu ku waysay, labadaba iyo ka baxsan goobta Grenfell Tower. In ka badan 2,000 oo qof, oo qaar badan oo kamid ah ay si dhow u saamaysay musiibada, ayaa ka dhiibtay aragtidooda ku saabsan xusitaanka mustaqbalka; iyadoo dadka qaar ay nala hadleen wax ka badan hal mar.  Warbixinadeenu waxay qeexayaan qaar badan oo kamid ah filashadayada iyo rabitaankayaga iyo qaybaha kale ee bulshada ee ku saabsan goobta xuska ee Grenfell waxa lagu dari karo iyo sida ay goobtani ay dareemi doonto mustaqbalka.  Naqshadaynta kooban ayaa si aad ah loo qoray si waafaqsan warbixinadan waxayna ku dhistay fikrado bilow ah oo shakhsiyaadka bulshada Grenfell ay nala wadaageen.

Go'aanka ku saabsan mustaqbalka Grenfell Tower waa mid u gaar ah dowlada, laakiin si lamid ah waxaan ognahay in Grenfell Tower aysan waligeed sii ahaan karin qaabka ay hadda tahay. Waxaan sugaynaa cadayn dheeri ah oo aad loogu baahan yahay oo ku saabsan Tower, iyo wakhtiyada go'aanka dowlada. Inta aan sugayno ilaa tan la xalinayo waxa aanu aad u danaynaynaa in aanu sii wadno habraacan doorashada si aanu u helno koox nashqadeeya

[1] **Remembering Grenfell: our journey so far** (Maayo 2022) https://www.grenfelltowermemorial.co.uk/remembering-grenfell

[2] **Remembering Grenfell: Recommendations and next steps to a memorial** (Noofeembar 2023) https://www.grenfelltowermemorial.co.uk/report2023

marka go'aanka munaarada la gaaro. Waxaan fahamsanahay in midani ay tahay caqabad laakiin taageerada la hubo ee Xog-haynta Gudiga waxaan ku kalsoonahay in ka qaybgalayaasha habraaca xulashada ay yeelan doonaan khibrad iyo hal-abuur si ay uga shaqeeyaan caqabadan gaarka ah si ay u bixiyaan xuska ku haboon Grenfell.

Haddi aad ka timid London, Boqortooyada Ingrisiiga oo dhan ama wadan kale, waxaanu jecelnahay inaanu kugu dhiirigalino inaad ka fikirto dhisitaanka koox oo aad soo gudbiso muujinta xiisaha. Waxaan jeclaan lahayn inaad sharaxdo dhiirigalintaada soo gudbinta dareenkaaga si aad u qaabayso xus ixtiraam leh, geesinimo leh oo waarta si aad u xasuusato kuwii naftooda ku waayay musiibadii Grenfell Tower. Waanu kaaga mahadcelinaynaa inaad wakhtiga ku bixisay akhrinta dhukumiintigan waxaanan rajaynaynaa inaad dareento sharaf iyo dhiirigalin inaad soo gudbiso hindise bilow ah oo ku saabsan gudiga naqshadaynta oo aad muhiim u ah.

**Waxaa saxeexay,** Adel Chaoui, Hanan Wahabi, Hassan Awadh Hassan, Nabil Choucair, Sandra Ruiz, Abe Abebe, Hanan Cherbika, Mohammed Rasoul, Andrea Newton, Susan Al-Safadi
**Wakiilada bulshada ee Grenfell Tower Memorial Commission**

Thelma Stober DL, Lord Paul Boateng CVO
**Gudoomiyayaasha Grenfell Tower Memorial Commission**

## Bayaanka furitaanka

Habeenkii Arbacada 14 Juun 2017, dab ayaa ka kacay gudaha Grenfell Tower ee Lancaster West Estate ee Waqooyiga Kensington. Markii uu qabsaday, wuxuu si degdeg ah ugu fiday dhamaan dhismaha iyo korka dabaqa 23[3], iyada oo si naxdin leh u dishay nolosha 72 qof oo burburisay qaab-dhismeedka dhismaha. Wax badan ayaa laga soo sheegay, lagana waramay, lagana qoray masiibadan, saamaynta ay ku yeelatay nolosha aan la soo koobi karin iyo saamaynta ay ku yeelatay xaafadaha iyo bulshada ku xeeran. Udub dhexaadka Habraaca Xulashada Kooxda Naqshadaynta Caalamiga ah waa rabitaan ah in la qiro dhacdooyinka masiibada ah ee dabka lana xasuusto nolosha kuwa la jecel yahay iyo kuwa ku dhintay. Iyada oo loo adeegsanayo awooda naqshadeynta, waxaa jira rabitaan wadajir ah oo lagu abuurayo goob ay dadku isugu yimaadaan si ay dib ugu milicsadaan masiibada, u helaan awood, oo u xusaan xuska dadka naftooda waayey.

Marka la qorayo qoraalkan kooban ee naqshadaynta, kalmado si taxadar leh ayaa loo doortay. Waxaa lagu dadaalay in sida ugu macquulsan loo cadeeyo cida iyo waxa lagu sheegay luuqada loo adeegsado warbixinadii hore ee Gudiga iyo qoraalkan dhexdiisa. Tusaale ahaan, waxaa si gaar ah loo xusay bulshada Grenfell, taasoo la micno ah qoysaska dhintay, kuwa badbaaday, deegaanka Lancaster West Estate iyo bulshada dhow ee ku nool agagaarka Grenfell Tower. Mararka qaarkood isticmaalka 'Grenfell' kaligiis waxay astaan u tahay musiibada oo calaamad u ah xuska. Ereygan si joogto ah ayaa loo adeegsadaa. Waxaa la fahamsan yahay in luuqadan aysan noqon karin waxa qof kastaa dooran lahaa, laakiin waxaa lagu dadaalay inay noqoto mid xasaasi ah oo qeexan intii suurtagal ah.

Calaamad xushmad ahaaneed dadka ay dhibaatada masiibada saameysey, Gudiga, la-taliyayaashooda iyo xubnaha bulshada Grenfell waa inaan si toos ah loo wajahin ama looga codsanin macluumaadka sababtoo ah midani waxay sababi kartaa in laga saaro habka xulashada kooxda naqshadeynta.

Nidaamka doorashada waxaa maamulaya oo waxaa sameeya Tartamada RIBA[4] iyagoo matalaya gudiga iyo bulshada Grenfell. Ururadu way isdiiwaangelin karaan si ay uga qaybqaataan habraaca xulashada, marka hore adoo iska diiwaangalinaya websaytka wax iibsiga ee la isticmaalayo: [New User Registration]

[3] Grenfell Tower waxay ka kooban tahay dabaqa hoose, 23 dabaq oo lambar leh iyo qolka agabka oo ku yaal xaga sare ee dhismaha. Warbixinada farsamada qaarkood ayaa sheegayaan in dhismuhu leeyahay 25 dabaq, oo ay ku jiraan dabaqa hoose iyo qolka agabka ee ku yaal xagga sare ee dhismaha (eeg cutubka 3.4 si aad u hesho sharaxaad dheeraad ah ee Tower).

[4] RIBA - Royal Institute of British Architects

# 1 Hordhaca habraaca xulashada

1.1 Midani waa Wajiga 1 ee Naqshadaynta Kooban oo loogu talagalay Habraaca Xulashada Kooxda Naqshad ee Grenfell Tower Memorial Commission. Tani waxay ku martiqaadaysaa kooxaha nashqadaynta ee raba inay diyaariyaan soo jeedin si taxadar leh loo tixgaliyay oo qeexaysa dhiirigalintooda ka qaybgalka, kartidooda inay la shaqeeyaan bulshada Grenfell, bixinta iyo dhamaystirka tusaalooyinka mashruuca iyo waayo-aragnimada guud iyo isu-dheelitirka kooxda naqshadaynta.

1.2 Wajiga 2 wuxuu martiqaadayaa ilaa shan kooxood oo la soo xulay si ay u sameeyaan naqshadahooda hordhaca ah iyaga oo isticmaalaya fikradaha bulshada Grenfell. Kooxuhu waxay sawiri doonaan qaybaha soo jeedintooda ee la xiriira Tower aan dhisnayn ama aan dhisnayn, diirada ayaa la saarayaa inay doortaan kooxda naqshadaynta saxda ah halkii ay dhamaystiri lahaayeen naqshad xusitaanka gaar ah.

1.3 Soo koobitaanka wuxuu qeexayaa mabaadi'da naqshadaynta hagaya ee goobta xusitaanka iyo habka xulashada. Waxay sharxaysaa sida loo diyaariyo soo gudbinta bilowga ah iyo sida kooxaha iyo soo jeedinta loogu qori doono liistada wajiga labaad.

1.4 Habraaca xulashada waxaa hogaaminaya Grenfell Tower Memorial Commission (Gudiga) iyagoo ka wakiil ah bulshada Grenfell. Habraaca wuxuu hubin doonaa in bulshada Grenfell ay si dhow ugu qeybqaataan habraaca xulashada oo ay helaan fursad ay ku falanqeeyaan oo ay wada hadal firfircoon la yeeshaan kooxaha la soo xulay inta lagu jiro Wajiga 2 ee Habraaca Xulashada Kooxda Naqshadaynta iyo marxaladaha naqshadeynta ee xiga. Tani waxay hubin doontaa in fikradaha naqshadaynta ee soo kordhaya loo sameeyo si wadajir ah Gudiga iyo bulshada Grenfell iyo kuwa uu saameeyay dabka iyo wixii ka dambeeyay.

1.5 Gudiga waxaa loo dhisay inuu ku shaqeeyo iyagoo matalaya Grenfell si ay uga caawiyaan hagitaanka habraaca go'aan gaarista iyo bixinta fursadaha mustaqbalka fog ee goobta. Gudiga wuxuu ka kooban yahay toban wakiil oo bulshada ah: kala bar waa xubno qoyskooda ku geeriyoodey, sadex waxay matalaan kuwa ka badbaaday dabka, labana waxay ku noolaayeen Lancaster West Estate sanado badan. Waxa kale oo jira labo gudoomiye. Gudigu wuxuu keenaa xirfado, waayo-aragnimo iyo aragtiyo kala duwan shaqadooda iyo si mutadhawacnimo ahaan waa inay ku haboonaadaan shaqadan oo ku saabsan hawlaha kale iyo balanqaadyada qoyska. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan ururkooda iyo Shuruudaha tixraaca ayaa laga heli karaa websaytka Grenfell Tower Memorial[5].

[5] **Shuruudaha Tixraaca Grenfell Tower Memorial Commission** https://www.grenfelltowermemorial.co.uk/terms-reference

1.6 Memorial Commission ayaa hogaamin doona habraaca xulashada iyagoo ka wakiil ah bulshada Grenfell shaqadoodana waxaa taageeraya la-taliyayaal madaxbannaan iyo khubaro farsamo. Gudigu wuxuu ka shaqayn doonaa inuu taageero samaynta fikrada naqshadaynta hore, iyada oo loo adeegsanayo soo jeedinta naqshadaynta iyo dhismaha oo faahfaahsan. Dawladu waxay ku taageeri doontaa Gudiga sidii Macmiilka Qandaraasle ahaan si ay u sameeyaan, u dhammaystiraan una furaan goobta xuska. Habraaca xulashada waxa loo adeegsan doonaa laba weji kadibna waxa raaci doona waji samaynta naqashadaynta oo la shaqaynaysa bulshada Grenfell oo ay ku xigto codsiga qorshaynta ka dibna dhismaha goobta xusitaanka.

1.7 Wajiga 1 Naqshadaynta Kooban ayaa dejisa aragtida bilowga ah ee bulshada Grenfell ee xuska oo qeexaysa goobta, macnaha guud iyo caqabadaha jir ahaaneed. Qoraalkan kooban waxaa sidoo kale oo uu bixiyaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan sida ururadu u tixgelinayaan la shaqaynta ururada iyo shakhsiyaadka ka kooban bulshada deegaanka ee kala duwan. Waxay sharaxaysaa mabaadi'da naqshadaynta bilowga ah ee goobta xusitaanka, sida looga fikiro qaab-dhismeedka kooxda naqshadaynta, iyo waxa loo baahan yahay in lagu daro soo jeedinta. Waxay bixisaa taariikhaha muhiimka ah iyo wakhtiyada kama dambaysta ah habraaca xulashada iyo shuruudaha loo isticmaali doono si loo qiimeeyo soo gudbin kasta. Shuruudo ayaa lagu soo daray kuwaas oo u baahan doona inuu raaco qof kasta oo gala habraaca xulashada. Naqshadaynta kooban oo Wajiga 2 oo faahfaahsan ayaa markaa la siin doonaa kooxaha lagu martiqaaday inay ka qaybqaataan wajiga labaad ee habraaca xulashada.

1.8 Dhamaan kooxaha loo xushay inay ka qaybqaataan Wajiga 2 waxa la siin doonaa abaalmarin lacageed oo dhan £20,000 (+VAT) taasoo wax ku biirinaysa wakhtiga looga baahan doono diyaarinta soo gudbinta faahfaahsan. Midan waxaa la bixin doonaa dhamaadka habraaca xulashada kadib markii si buuxda uga qaybqaatay habraaca iyo marka la helo soo gudbin buuxda oo waafaqsan. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan lacag bixinta sharafta waxaa lagu bixin doonaa qoraalka kooban ee wejiga 2.

1.9 Marka la soo koobo, habraaca naqshadaynta waxaa kamid ahaan doona:

**Wajiga 1 - Soo Dhajinta kooxaha:**
Kooxaha waxaa laga codsanayaa inay soo gudbiyaan waxyaabaha soo socda:

- Ku dhiirigelinta ka qaybgalka habraacan xulashada
- Awooda in lala shaqeeyo bulshada Grenfell
- Waayo-aragnimada guud iyo dheelitirnaanta kooxda naqshadeynta

**Natiijada**: ilaa shan kooxood ayaa la soo xulay

**Wajiga 2 - doorashada kooxda iyo qaabka naqshadaynta bilowga ah:**
Kooxaha lasoo xushay waxaa laga codsanayaa inay sameeyaan waxyaabaha soo socda:

- Xaqiijinta ama la qabsiga kooxda naqshadeynta
- Sharax sida bulshada Grenfell uga qaybqaadan doonto

- Habraaca naqshadaynta bilowga ah, fikrada iyo muujinta muuqaalka waxa qayb kamid ah xusuusta u ekaan karto haddii soo jeedintu u socoto naqshad faahfaahsan.

**Natiijada:** hal koox ayaa la doortay si ay u sameeyaan naqshadaynta Grenfell Tower memorial

**Kadib habraaca xulashada**

Kooxda la xushay waxay ka qeybqaadan doonaan waxyaabaha soo socda:

- Samaynta naqshadeynta bulshada Grenfell
- Diyaarinta sawiro faahfaahsan iyo soo gudbinta codsiga qorshaynta
- Caawinta xulashada qandaraaslayaasha ku hbboon si loo dhiso goobta xuska

Kooxda la soo doorto waxaa laga yaabaa inay ka qeybqaataan waxyaabaha soo socda:

- Caawinta kormeeritaanka dhismaha Memorial oo ay weheliyaan La-taliyayaasha Farsamo ee la magacaabay
- Iyadoo la tixgalinayo saamaynta naqshadaynta ee istaraatiijiyada maaraynta mudada dheer iyo qabanqaabada goobta.

1.10 Kooxaha naqshadaynta waxay u baahan doonaan inay dejiyaan hab dabacsan oo iskaashi ah oo lagu naqshadeeyo horumarinta marxaladaha hore ee mashruuca iyo barnaamijka ka hor inta aan go'aan laga gaarin mustaqbalka munaaradda. Mudada lagu jiro iyo kadib habraaca go'aan gaarista ee mustaqbalka taageerada Tower waxaa bixin doona xog-haynta Gudiga iyo kooxda mashruuca oo dhan.

1.11 Dawlada Boqortooyada Ingiriisiga (HMG) waxay taageertaa shaqada Gudiga iyada oo loo marayo koox xog-haya ah oo u go'an, oo ay wahaliso maamulka mashruuca, taageerada ganacsiga iyo talada siyaasada Ministry of Housing, Communities and Local Government. Waaxdu waxay noqon doontaa hay'adda wax soo iibsanaysa ee naqshadeynta iyo dhismaha goobta xuska.

## 2 Himilada Goobta Xuska

2.1 Himilada Grenfell Tower memorial waa in la abuuro goob xasaasi ah oo ku haboon oo u adeegi doonta hab joogto ah oo lagu xaso kuwa naftooda ku waayay iyo kuwa ay saameeyeen masiibada. Habraacyada la soo jeediyay ee xuska waa inay ka turjumaan oo horumariyaan himiladan ay si wada jir ah u qaabeeyeen bulshada Grenfell. Habraaca dhisitanka himilada waxaa lagu sharaxay si faahfaahsan warbixintii ugu horaysay '**Remembering Grenfell: our journey so far**' (oo la daabacay Maayo 2022) iyo faahfaahin dheeraad ah ayaa lagu bixiyay warbixintii ugu dambeysay'**Remembering Grenfel**: **Recommendations and next steps to a memorial**' (oo la daabacay Noofeembar 2023).

**Mawduucyada Soo baxaya ee goobta xusitaanka**

2.2 Hamiga bulshada Grenfell waxay si toos ah ugu wargaliyeen mawduucyada soo baxaya ee taageeraya himilada waxayna muhiim u noqon doonaan hagitaanka habka naqshadaynta goobta xuska; waxay ka kooban yihiin waxyaabaha soo socda:

- Nabad iyo Dib u milicsi
- Xushmad iyo xusitaan
- Rajo iyo Niyad Sami
- Bulsho iyo jacayl.

2.3 Kooxaha naqshadaynta waxaa laga codsaday inay isticmaalaan afartan mawduuc si ay si toos ah u qaabeeyaan naqshadda iyo jawiga Grenfell memorial. Fiiro gaar ah waa in la siiyaa 'nabada iyo dib u milicsiga' iyo 'ixtiraam iyo xusitaanka', sababtoo ah kuwani waxay ahaayeen mawduucyadii ugu caansanaa ee soo baxay horaantii iyo sii waditaanka ka qaybgalka bulshada Grenfell. Iyagu waa udub-dhexaad u ah bayaanka himilada iyo aasaaska ay Grenfell Memorial ku dhisan tahay.

**Bayaanka himilada hore ee goobta xuska**

2.4 Bayaanka Himilada Grenfell Tower Memorial wuxuu sawirayaa himilo dhiirigalin leh oo mustaqbalka goobta xuska, iyadoo oo ka caawinaya inaysan hagto muuqaalkeeda jir ahaaneed oo keliya balse dareenka si qoto dheer u kiciso shucuurta. Waa inay aasaas u noqotaa xusitaan aan ahayn keliya isu-imaatin oo ay sidoo kale kor u qaadaa.

> *Grenfell memorial waxay noqon doontaa goob **nabdoon** Waxay siin doontaa goobo banan oo lagu talagalay in **did loogu milicsado** oo lagu **xasuusto** dadkii naftooda waayey, sababta ay masiibadani u dhacday iyo **baahida loo qabo cadaalada**.*

*Goobta Xusitaanka waxay **ka tarjumi doontaa bulshada** Grenfell iyo **jacaylka** ku jira, iyada oo kicinaysa dareen rajo iyo **niyad sami** oo **xasuusan doona wixii hore** oo **rajaynaya mustaqbalka.***

*Waxay noqon doontaa goob ay isugu **yimaadaan dadka** laga dhintay, kuwa badbaaday iyo xubnaha bulshada deegaanka.*

*Xusitaan **xushmad leh, geesinimo leh oo waarta** oo lagu sharfo dadkii ku dhintay iyo qoysaskoodii, kuwii ka badbaaday dabka iyo xubnaha bulshada deegaanka.*

**Waxa ay xusitaanka u baahan tahay inay ka guulgaarto**

2.5 Sadex ujeedo oo muhiim ah ayaa loo dejiyay xuska iyo dejinta:

- **Xusuus geesinimo leh** - si loo abuuro wax ka badan goob xusitaan fudud. Waxaa la qiyaasayaa in nashqaduhu uu yahay mid gaar ah oo qalbi furan, xasuusin dareen leh iyo ixtiraam xoog leh oo loogu talagalay kuwa udub dhexaad u ah masiibada.

- **Xusitaan ku haboon** - xuska wuxuu si qoto dheer ula falgali doonaa bulshada Grenfell, iyada oo soo koobaysa baahidooda xusitaan iyo qadarinta xuska ee dadka dhintay. Waxay sidoo kale oo ay kobcin doontaa firfircoonida, xaafad dhaqamo qani ah oo ay dhex fadhido.

- **Xusitaan waara** - nashqada la soo jeediyay, agabka iyo qaab-dhismeedyada waa inay ahaadaan kuwo adag, mudo badan jiri kara, oo waara. Waa inay ahaataa mid joogto ah si loo hubiyo in masiibadii iyo naftii lagu waayey aan weligood la ilaawin oo si cad loogu sheego jiilasha soo socda.

Mabaadi'da hagitaanka ee xuska waxay ku dhisan yihiin hamigan, kuwaas oo lagu sharaxay Qaybta 5 ee qoraalkan kooban.

## 3 Goobta Xusitaanka iyo agagaarka

3.1 Goobta Grenfell Tower Memorial waa qayb muhiim ah oo gaar ah oo kamid ah isku dhafka magaalada ee galbeedka London. Waa qayb kamid ah xaafadaha ugu hoeeya ee ay isku xirtay shabakad caan ah oo wadooyin iyo tareeno ah. Tani waxa ku jira korka A40 Westway iyo A3220 West Cross Route iyo Hammersmith & City iyo khadadka Circle Tube. Latimer Road Station waxay u jirtaa galbeedka goobta oo waxa ay siisaa xiriira dhaw oo la leh nidaamka dhulka hoostiisa mara iyo bartamaha London.

**Goobta**

3.2 Dhulka waxaa loo talagalau xusutaanka laftiisa waxaa lagu qeexay xuduud mashruuc oo lagu muujiyay jaantuska 1 kaas oo qiyaastii ah 3,400 mitir oo laba jibbaaran ama 0.34 hektar oo cabbir ah. Goobta waxaa ku hareeraysan noocyo kala duwan oo muuqaal furan iyo goobo fagaare ah oo bixin doona goobta xusuusta iyo meelaha muhiimka ah ee helitaanka. Hada goobta loogu talagalay iyo inta badan agagaarkeeda waxa si badqab leh ugu dhagan yahay goob kaydin iyo dayrar maadaama goobta hadda loo isticmaalo dayactirka iyo hawlaha maamulka, kaydinta qalabka, adeega iyo hoyga shaqaalaha.

3.3 Goobtu waxay ku dhex taal degmada Royal Borough of Kensington iyo Chelsea waxayna ku taal meel u dhow xarunta Notting Dale Ward. Tani waa xaafad dad badan, kala duwan, dhaqamo kala duwan iyo diimo kala duwan oo lagu qiyaaso inay ku nool yihiin ku dhawaad 9,900 qof oo deegaan ah (2023). Waa xaafad leh sinaan la'aan bulsho, dhaqaale iyo caafimaad oo daran marka la barbar dhigo degmooyinka kale ee degmada iyo guud ahaan London. Xisaabin tirakoob ahaaneed oo kala duwan oo loogu talagalay Notting Dale Ward ayaa laga heli karaa Dukaanka Xogta ee London[6] iyo Xogta Ward[7] ee ay daabacdo degmadu.


**Grenfell Tower iyo qaybta hoose**

3.4 Minaarada waxay ahayd astaanta galbeedka London tan iyo markii la dhisay 1974-kii, oo hada lagu xidhay dahaadh ilaalineed waxay u adeegtaa xasuusin muuqaal ah oo caan ah masiibada. Minaarada wuxuu muhiimad wayn u leeyahay bulshada Grenfell. Dhismaha waxaa si weyn u waxyeeleeyay saameynta dabka iyo qaab dhismeedkiisa waxaa lagu xoojiyay qaab gudaha ah oo taageeraya qaabka birta. Qof kastaa wuxuu isku raacsan yahay in haddii taawarku soo dego si taxadar leh oo ixtiraam leh loo burburiyo, loona ixtiraamo kuwii naftooda ku waayey. Komishanku maaha kuwo masuul ka ah go'aannada mustaqbalkooda ku xeeran, maadaama ay arintani tahay mid u taala xukuumada oo iyagu si gaar ah bulshada ula hadlaya arintan.

[6] The London Data Store, Mayor of London (2023) - https://data.london.gov.uk/dataset/ward-profiles-and-atlas
[7] Notting Dale Ward Profile, Royal Borough of Kensington and Chelsea (2014) - https://www.rbkc.gov.uk/pdf/Notting%20Daledata.pdf

Natiijada kama dambaysta ah ee xaalada Grenfell Tower waxaa qaadi doonta dawlada. Go'aanka ka hor, kooxaha naqshadaynta waxay u baahan doonaan inay joogteeyaan hab dabacsan oo naqshadaynta.

Jaantuska 1: Qorshaha guud ee goobta iyo xadka goobta xusuusta



**Isticmaalja Dhulka Agagaarka ah**

3.5 Lancaster West Estate, oo la naqdiyay dabayaaqadii 1960-meeyadii oo asaas ahaan la dhisay 1970-meeyadii, ayaa leh 'wadooyinka samada' oo leh wadooyin dhaadheer iyo meelo cagaaran oo deeqsi ah. Grenfell Tower waxay qayb ka ahayd horumarkan. Si kastaba ha ahaatee, meelaha baabuurta la dhigto ee dhulka hoostiisa ah iyo goobaha adeega ee ku dhegan goobta xusuusta iyo xuduudka mashruuca, waxay abuuraan meelo mugdi ah oo aan soo jiidasho lahayn, kuwaas oo u baahan tixgelin taxadar leh horumarinta xusuusta. Ku xiga Kensington Aldridge Academy, dugsi sare oo isku dhafan oo leh in ka badan 1,300 arday, iyo xarunta madadaalada ee ku dhow, oo bixisa tas-hiilaad madadaalo oo kala duwan, ayaa labadaba la furay iyada oo qayb ka ah mashruuca dib u dhiska inta u dhaxaysa 2014 iyo 2015. Kadib dabkii Grenfell Tower, akadeemiyadu si ku meel gaar ah ayay u guurtay laakiin waxay ku soo noqotay 2018.

**Goobaha banaan oo ku hareeraysan**

3.6 Goobaha furan ayaa qayb aad muhiim u ah ka ciyaara nolosha bulsho iyo dhaqameed ee kuwa ku nool aaga, gaar ahaan tan iyo masiibadii. Kuwani waxa ay siiyeen meelo ay dadku si gaar ah iyo si guud uga fakaraan masiibada, si ay isugu yimaadaan oo ay uga qayb qaataan mashruucyo hal abuur leh, si ay uga fikiraan oo ay u koraan dhirta. Waa goobo sidoo kale la qabsanaya si ay u daboolaan baahiyaha dhaqamada kala duwan iyo kuwa ka dhexeeya. Jir ahaan meelahan banaan waxa ay isku xiraan xaafado kala duwan, iyaga oo abuuraya shabakad si fiican loo isticmaalo oo dadka lugaynaya iyo jidadka baaskiilka. Waxay bixiyaan meelo qiimo leh oo ay caruurtu ku ciyaaraan, dhalinyaradu ku kulmaan oo ay martigeliyaan beer-beeris bulsho iyo beero gudaha ah, gaar ahaan meelaha qoraxdu ka badan tahay ee xiran.

3.7 Goobta xuska loogu talagalay waxay leedahay meelo banaan oo kala duwan oo ku hareeraysan saldhiga Grenfell Tower. Aagan waxaa markii hore loo yiqiin Lancaster Green oo siisay muuqaal baaxad weyn iyo goob madadaalo Grenfell Tower ka hor dhismaha akadeemiyada iyo xarunta madadaalada. Dabka kahor goobta xuska ee ku hareeraysan munaarada waxay bixisay nasasho guud iyo meel madadaalo ah, meel caruurtu ku ciyaarto iyo shabakad wadooyin lug ah oo loogu talagalay dadka degan. Garoonkii hore ee ciyaarta oo dhanka galbeed ka xiga munaarada ayaa ahayd meel banaan oo caan ah oo si wanaagsan loo isticmaalo. Qalabkii ciyaarta ee jiray waa la saaray waxaana lagu hayaa meel kayd ah oo ay weheliyaan agabyo kale oo kala duwan oo goobta laga keenay. U dhisitaanka sagxada ee si badqab leh ayaa harsan, booskana wuxuu ku dhagan yahay dhanka koonfureed ee haray ee darbiga farshaxanka ee caanka ah. Dhinaca Bari ee Grenfell Tower waxay lahayd noocyo kala duwan oo muuqaal ah oo aan rasmi ahayn, caws ah iyo meelo laami ah oo ay kuxiran yihiin darbiyo fadhiyo hoose ah. Hada aagan waxa loo isticmaalayaa aqalada goobta iyo kaydinta agabka ku meel gaadhka ah.

**Qolka xuska ku meel gaarka ah**

3.8 Aaga galbeed ee goobta waxaa ku yaal aag xiran oo leh qol ku meel gaar ah oo bixisa qol yar oo daaqado waaweyn u soo jeeda dhanka Tower Grenfell. Meel yar oo banaan oo u dhaxaysa saqafka iyo munaarada ayaa ku dul yaalo caws macmal ah oo hada waxay siisaa meel gaar ah oo lagu fekero. In kasta oo ay tani tahay meel bannaan, had iyo jeer maaha mid furan oo ay heli karaan qoysaska maadaama gelitaanka gudaha kaydinta ay u egtahay oo keliya sanad-guurada. Qolka qolalka iyo aagan kuxiran labaduba waxay diyaar u yihiin inay si gaar ah u isticmaalaan qoysaska dhintay si ay u noqdaan meel ay ku xusuustaan kuwa ay jecel yihiin ka hor naqshadaynta iyo dhismaha xusuusta joogtada ah.

**Helitaanka Dadka Lugeynaya iyo gaadiidka iyo isu-socodka**

3.9 Waxaa jira afar dariiqo oo waaweyn oo dadka lugaynaya kuwaas oo siin doona gelitaanka goobta xusuusta mustaqbalka, in kasta oo goobta lafteeda aanay hada geli karin dadweynaha. Waxaa jira wado u go'an oo dhanka galbeed ah oo loo yaqaan Station Walk oo bixisa xiriir toos ah goobta laga bilaabo Bramley Road iyo Saldhiga dhulka hoostiisa mara ee Latimer Road. Dariiqan waxaa maalin walba isticmaala ardayda iyo macalimiinta qaarkood marka ay u sii socdaan ama ka imaanayaan Akadeemiyada.

3.10 Gelitaanka woqooyigu waxa uu la socdaa wado laami ah oo u dhaxaysa akadeemiyada iyo xarunta wakhtiga firaaqada taas oo sidoo kale siisa gelitaanka gidaarka Grenfell Tower Memorial ee jira. Tani waxay hada siinaysaa meel loogu talagalay alaabta xusuusta, fariimaha iyo sawirada in looga tago, iyo sidoo kale aag si guud loo heli karo si loo milicsado. Gelitaanka goobta laga bilaabo bari waa dariiqa lugaynta ee laga bilaabo Bomore Road ee dhexmarta meel cagaaran oo jirta oo ku xigta Xarunta Firaaqada. Ka soo gelida koonfurta waxay ku taal Grenfell Road oo leh dariiqyo cag yar oo labada dhinac ah.

3.11 Helitaanka Grenfell Road waxay hada bixisaa albaab sugan oo laga soo galo goobta iyo xafiisyada maamulka. Gelitaanka baabuurta ayaa sidoo kale lagu bixiyaa albaabkan sugan ee u horseedaya wado adeeg oo daboolan oo dhinac socota soohdinta koonfureed ee goobta. Dariiqan waxa loo isticmaalaa u adeegida iyo ururinta qashinka qaybta waqooyi ee Lancaster West Estate iyo dabaqyada banaan ee Grenfell Walk ee ku yaal hareeraha wadada adeegan. Aaga heerka dhulka ah waa meel xiran, hadh ah oo aan qurux badneyn, oo bixisa marin u helka adeegyada degdegga ah, aruurinta qashinka iyo taxane garaashyo gaar ah oo laga dejiyay wax ka hooseeya heerka dhulka (eeg lifaaqa A3, sawirka goobta 5).

3.12 Heerka sare waxa u soo dhawaada dariiqa lugeeya ee garab socda Station Walk oo siiya lugaynta dabaqa koowaad ee Grenfell Walk. Aagan dhul-weynaha guud hada waxa lagu xidhay kaydin taas oo xadidaysa gelitaanka muuqaalka iyo muuqaalka goobta xusuusta ee hoose (eeg lifaaqa A3 sawirka goobta 11 iyo 12). Goobtan lugaynta ahi waxay sidoo kale bixisa marin u helida dabaqa koowaad ee guryaha la dego ee Lancaster West Estate iyo guryaha hada banaan

ee ku teedsan Grenfell Walk. Waxa la filayaa in mustaqbalka qaybtan hanti-hoosaadka dawladeed ay bixin doonto aragti sare oo goobta xusuusta ah.

3.13 Wajiga 1, kooxaha naqshadaynta waxaa looga baahan yahay inay qeexaan dhiirigelintooda bilowga ah ee la xidhiidha naqshadaynta xusuusta, taas oo diiradda saari doonta habka ay u fuliyaan guddiyada dabeecadan oo ay muujiyeen shaqadoodii hore. Wajiga 2, kooxaha nashqadeynta ee la soo xulay waxay heli doonaan fursad ay ku sahamiyaan oo ay horumariyaan qaabkooda naqshadaynta bilowga ah, fikradaha iyo soo jeedinta hordhaca ah waxaana la siin doonaa macluumaad farsamo oo badan oo ay ku saleeyaan habkooda.

## 4 Bulshada Grenfell

4.1 Ma fududa in si cad loo qeexo 'kooxaha' kala duwan ee dadka ka tirsan bulshada Grenfell oo noloshooda ay si toos ah u saamaysay dhacdooyinka masiibada ah ee ku xeeran dabka iyo wixii ka dambeeya. Erayada iyo 'calaamadaha' waxay inta badan ku guuldareystaan inay cadaalad u sameeyaan sida khibradda shakhsi ahaaneed ee masiibada ay u kala qaybiso siyaabo badan. Iyada oo taas laga jawaabayo, kelmadaha si taxadar leh ayaa loo doortay oo marka bulshada Grenfell la sheego, waxaa loola jeedaa qoysaska dhintay, kuwa badbaaday, deganeyaasha Lancaster West Estate iyo bulshada u dhow ee ku nool meel u dhow Grenfell Tower. Waxaa la wada qirayaa inay jiraan waayo-aragnimo wadaag iyo mid gaar ah oo ka dhexeeya shakhsiyaadka iyo qoysaska ay saameeyeen, sida qoys kasta iyo qof kastaa uu u kala duwan yahay, malaha guudna lama samayn karo. Waxaa kaloo jira beelo ka tirsan beelo waaweyn.

4.2 Laga bilaabo bilawgii, komishanku waxa uu diirada saarayay inay maqlaan bulshada Grenfell oo ay fahmaan rabitaankooda, si ay gacan uga geystaan hubinta in xusuusta mustaqbalka ay ka tarjumi doonto kuwan. Mudo ku dhow afar sano oo hawl-gal ah, Gudigu waxa ay dejiyeen habab kala duwan oo ay doodaha bulshadu u dhici karaan, iyo in aragtida bulshada ee ku saabsan xusuusta la qabto lana duubo. Guud ahaan, 2,259 qof ayaa fikradahooda la wadaagay Komishanka, oo ay ku jiraan 31 ka mid ah 43 qoys ee ay ka dhinteen. Tani waxay ku dhacday qaab-dhismeedyo kala duwan, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xadidnayn hal-hal iyo wada-sheekeysi kooxeed, xog-waraysiyo, dhacdo-qof iyo kuwo khadka ah, iyo fursada lagu bixiyo aragtiyo luqado kala duwan ah. Habkan waxa loo dejiyay in lagu taageero oo dadka awood u siiyo in ay la xidhiidhaan Komishanka si kasta oo ay ugu haboon tahay. Gudigu waxa kale oo ay garwaaqsadeen in qof kastaa aanu dareemin in uu awood u leeyahay ama diyaar u yahay in laga wada hadlo xusuusta mustaqbalka.

4.3 Sida bilowga ah, waxaa jira la isku raacsan yahay in aragtida qoysaska dhintay ay tahay in ay leeyihiin miisaanka ugu badan. Tan waxa laga maqlay bulshada deegaanka iyada oo loo marayo wada-hadalo wacyi-gelin ah iyo wadahadal lala yeeshay badbaadayaasha iyo xubnaha qoyska. Si taas loo muujiyo Gudiga waxaa loo qaabeeyey si loo hubiyo in codka dadka dhintay uu qaado miisaanka ugu badan. Ka sokow la shaqeynta bulshada, habka naqshadeynta iyo bixinta xusuusta waxay sidoo kale u baahan doontaa la tashi joogto ah oo rasmi ah oo lala yeesho ururada maxalliga ah iyo hay'adaha sharciga ah. Tani waxay noqon doontaa qayb ka mid ah la-tashiga qorshaynta rasmiga ah, codsiga iyo habka ogolaanshaha kaas oo raaci doona habka xulashada kooxda naqshadeynta.

### Ixtiraamka bulshada

4.4 Ururinta macluumaadka asalka iyo aragtida ee aagga iyo qaabka suurtogalka ah ee naqshadaynta waa in loo qabtaa si tixgalin iyo xasaasi ah. Komishanku waxa ay wakhti badan galiyeen sidii ay u fahmi lahaayeen rabitaanka bulshada kuwaas oo ku qornaa labada warbixin

ee la daabacay oo lagu sheegay qoraalkan kooban ee nashqadaynta. Bulshada Grenfell waxay soo martay jug weyn waxaana kooxaha laga codsanayaa inay ixtiraamaan tan iyo inay u nugul yihiin sirta shaqsiyaadka.

4.5 Wajiga 2 ee habka xulashada ayaa siin doonta fursad rasmi ah bulshada Grenfell si ay ula kulmaan oo ay ula falgalaan kooxaha naqshadaynta ee liiska la soo xulay iyada oo loo marayo fadhiyo diirada lagu saaray oo ay soo abaabushay Xoghaynta Komishanka. Tani waxay hubin doontaa in bulshada Grenfell ay si toos ah ugu wargelin karto horumarinta naqshadeynta xusuusta iyo xulashada kooxda naqshadeynta. Kooxda ugu dambayntii la doortay waxay markaas si dhow oo iskaashi leh ula shaqayn doontaa Komishanka iyo bulshada Grenfell si loo hubiyo in naqshadaynta xusuusta ay ku jirto fikradahooda iyo rabitaankooda iyo in qaabaynta iyo gaadhsiinta xusku run ahaantii tahay bulshada ay hogaaminayso.

## 5 Mabaadi'da hagaya naqshadaynta

5.1 Ujeedada koowaad waa in la abuuro xusitaan ixtiraam leh, waara oo waara oo sharfaya kuwa naftooda waayey. Mabaadi'da naqshadaynta hagta ee soo socota ee xusuusta ayaa lagu sameeyay aragtida ka-qaybgalka ee laga soo ururiyay bulshada Grenfell. Faahfaahin dheeraad ah ayaa lagu bixin doonaa wajiga 2 ee habka xulashada.

- **Jawiga xusuusta** - abuurista  xasuus loogu talagalay in lagu muujiyo dareenka nabada iyo milicsiga, meel la ixtiraamo oo lagu ixtiraamo xusuusta kuwa naftooda waayey iyo mid ka mid ah u nugul kala duwanaanshahooda dhaqan. Tani waxay noqon doontaa meel ixtiraamka iyo xusuusta ay ka soo baxaan dhinac kasta iyo faahfaahinta xusuusta.

- **Qaab-dhismeedka xusuusta** - abuurista xusuus muhiim ah oo waara taas oo lagu dhex dejiyay ama ka dhigaysa qayb ka mid ah goobta beerta muuqaalka ee xiisaha leh. Xusuustu waa inay lahaataa dherer iyo ilaalin cimilo, oo bixisa meel lagu tukado iyo milicsiga, lagu daro biyaha oo la aqoonsado magacyada kuwii naftooda waayey.

- Isticmaalka xusuusta - abuurista meel sharaf leh oo loogu talagalay xuska iyo xusuusta. Waxay noqon doontaa meel lagu fiirsado, ducada, iyo wadajirka, looguna talagalay marti gelinta munaasabadaha xusuusta iyo bixinta gabbaadka fikirka shakhsi ahaaneed iyo nasteexada wadajirka ah.

**Jawiga xusuusta**

5.2 Jawiga xusuustu waa inuu mudnaanta siiyaa tayada meel nabdoon oo milicsi leh iyo meel bixinaysa ixtiraam iyo xusuus. Shuruudahan waxaa siisay sumcadda ugu weyn ee bulshada Grenfell waxayna ka tarjumaysaa himilooyinka muhiimka ah ee loo dejiyay xusuusta Grenfell ee lagu qeexay aragtida. In kasta oo ay aad u yar tahay, mawduucyada rajada, togan iyo jacaylka iyo bulshada waa in sidoo kale lagu tixgaliyaa soo jeedinta.

**Qaabdhismeedka xusuusta**

5.3 Dhamaan wada-hadaladii lala yeeshay bulshada Grenfell, soo jeedinta la door biday ee xusku waxay ahayd beer la beeray, muuqaal dhamaan kooxaha inta badan la sheego. In kasta oo ay jirto door xoog leh oo ay beerta u tahay in ay noqoto qaybta dhexe ee xusuusta tan waxa kale oo lagu kabi doonaa dhismo ama qaab-dhismeed siiya hoy iyo meel bannaan oo lagu milicsado. Intaa waxaa dheer, waxaa jira rajo ah in lagu daro taallo ama farshaxan, kobcinta xusuusta si ay uga dhigto mid macno leh oo ku haboon Grenfell. Qaybaha muhiimka ah ee ka qayb qaadan kara qaabka iyo qaab-dhismeedka xusuusta ayaa lagu soo koobay hoos.

*Beerta muuqaalka xusuusta*

5.4 Muuqaalka dhulku wuxuu bixiyaa calaamad xoog leh oo koriin, cusbooneysiin iyo bogsiin Heshiiska ugu weyn ayaa ahaa in xusuusta Grenfell ay yeelato miisaan weyn oo lagu dhejiyo meel beerta dhexdeeda ah. Taariikhda oo dhan muuqaalada iyo jardiinooyinka ayaa loo isticmaalay in lagu gudbiyo macnaha astaan, ruuxi iyo diineed, oo leh tusaalayaal badan oo cajiib ah oo isku daraya tayada iyo sifooyinka dhaqamada kala duwan. Iyadoo la soo jeediyay in beertu ay udub dhexaad u tahay naqshadaynta xusuusta, waa inay sidoo kale xisaabta ku dartaa xubno taxane ah.

*Qaybaha*

5.6. Xusku waa inuu si cad u soo bandhigaa magacyada 72 dhibanayaasha, oo leh ikhtiyaarka qoysaska murugada leh sida iyo hadii lagu daro. Qayb ka mid ah Dhererka waxaa loo tixgelin karaa si xasaasi ah si loo dheelitiro muuqaalka iyo saameynta bulshada. Biyaha, calaamad u ah xasiloonida, iyo iftiinka, oo horey loogu isticmaalay xusuusta Grenfell, sida nalalka iftiinka Tower, iyo dhismayaal kale oo cagaar ah inta lagu jiro sanad-guurada, ayaa ah walxaha muhiimka ah ee lagu daro. Farshaxanku waa inuu ka tarjumayaa hal-abuurka bulshada deegaanka oo kiciyaa shucuur jacayl, rajo, iyo murugo. Midabka cagaarka ah, oo astaan u ah xusuusta iyo wadajirka, ayaa ah mid muhiim ah, iyadoo quluubta cagaaran ay yihiin astaamo la qadariyo. Qalabka Grenfell Tower waa lagu dari karaa, laakiin isticmaalkoodu wuxuu ku xidhan yahay dareenka, suurtogalnimada, iyo ku haboonaanta. Faahfaahin dheeraad ah ayaa lagu bixin doonaa wajiga 2 ee habka xulashada.

*Dhisme ama qaab dhismeed*

5.7 Meel ama meel ka ilaalinaysa canaasiirta si ay u suurtageliso ducada guud ama shakhsi ahaaneed iyo milicsiga sanadka oo dhan iyo wakhtiyo kala duwan oo maalinta ah waxaa soo jeediyay shakhsiyaadka qaarkood. Dadka ayaa sidoo kale soo jeediyay in dhismo loo bixin karo arimo waxbarasho iyo bulsho, halka kuwa kale ay walaac ka muujiyeen in madxafka goobta ku yaal uu halis u gelin karo goobta inay noqoto meel loo dalxiis tago. Waxaa jiray codsiyo loogu talagalay qoysaska dhintay inay helaan meel ay ku fekeraan si degan oo ay weheliso meel ay ku qabtaan alaabada ay jecel yihiin. Arintaan ayaa si gaar ah muhiim u ah maadaama dabka uu xooganaa awgeed qaar kamid ah qoysaskii ay ka geeriyoodeen eheladooda aysan u suurta galin in ay aas rasmi ah u sameeyaan eheladooda. Hadi dhismo la taaban karo uu ka dhigo qayb ama uu ku dhegan yahay naqshadda xusuusta kama dambaysta ah ayaan weli lagu heshiin bulshada Grenfell.

**Sida xusuusta loo isticmaali doono**

5.8 Xuska la hiigsanayo waa inuu u adeegaa sidii meel nabdoon oo lagu xasuusto iyo dib u milicsiga, oo ay hagto rabitaanka bulshada Grenfell. Waxay siin doontaa boosas dadka soo booqda ay ku fariistaan, ku nastaan, oo ay ka fikiraan, oo ay ku jiraan meelo badan oo gaar ah oo loogu talagalay kuwa u baahan kalinimada. Aqoonsiga kala duwanaanshaha dhaqameed ee bulshada, naqshaddu waxay dejin doontaa dhaqamada murugada ee kala duwan iyo dabbaaldegga nolosha, oo ay ku jiraan meelo bannaan oo diimeedyo kala duwan lagu tukado.

5.9 Xusku wuxuu martigelin doonaa shirar sanadle ah iyo labadii sanaba mar si loo xuso kuwa lumay loona taageero waxqabadyada bulshada sida kuwa diirada saaraya fanka iyo samaqabka. Xubnaha bulshada qaarkood ayaa soo jeediyay in lagu daro tas-hiilaadka waxbarasho ama madxaf halka kuwa kalena ay ka walaacsan yihiin inay noqoto goob dalxiis. Aagaga ku haboon carruurta iyo da'yarta waa in lagu daraa si loo sharfo carruurta naftooda ku waayey iyaga oo boosas u fidinaya dhalinyarada soo booqata. Meelaha dareenka iyo meelaha loo qoondeeyay milicsiga carruurta waa in sidoo kale la tixgeliyaa.

5.10 Intaa waxaa dheer, xusuustu waxay ku xidhmi doontaa kaydka dhijitaalka ah ee suurtogalka ah (taas oo ka baxsan xadkan kooban) oo waxay la xidhiidhi doontaa xusuusta kale ee maxaliga ah ee bulshadu samaysay. Si loo hubiyo in goobta ay sii ahaato mid ixtiraam leh, kooxaha naqshadeynta waxay u baahan doonaan inay maamulaan oo ay ka hortagaan dhaqdhaqaaqyada aan haboonayn, sida sigaarka, cabitaanka khamriga, eeyaha jimicsiga, dhaqanka aan haboonayn, iyo kharribaada.

**Maaayn waarta ooo mudada dheer**

5.11 Habka waara ee naqshadaynta, bixinta iyo ilaalinta xusuusta waa lama huraan. Soo jeedinta naqshadeynta mustaqbalka waa inay si xasaasi ah u muujisaa isticmaalka hufan ee kheyraadka, iyadoo la hubinayo in mashruucu yahay mid deegaan, bulsho, iyo dhaqaale ahaan waara. Feejignaan taxadar leh waa in la siiyaa qaab-dhismeedka iyo aasaaska muuqaalka iyo daryeelkooda mudada-dheer, iyada oo leh qorshe taxadar leh oo loogu talagalay maareynta nolosha oo dhan. Habka iyo naqshadeynta waa in ay awood u siiso bulshada in ay yeeshaan xiriir adag oo waaraya xusuusta, taas oo u ogolaanaysa koriinka dabiiciga ah iyo kobcinta waqti ka dib. Alaabta waa in lagu doortaa dareenka, mudnaanta siinaya waara, agab tayo sare leh oo hubinaya adkeysiga iyo saameynta ugu yar ee deegaanka. Shuruudaha joogtaynta oo faahfaahsan ayaa lagu bixin doonaa wejiga 2.

## 6 Kooxdaada naqshadaynta

6.1 Wajiga 1 wuxuu diirada saarayaa kooxdaada la soo jeediyay, sababtoo ah tani waxay saameyn toos ah ku yeelan doontaa habka aad ula shaqeyso gudiga, kooxaha bulshada iyo shakhsiyaadka. Waa muhiim in la faahfaahiyo cidda ku jirta kooxdaada, xirfadahooda, waayo-aragnimadooda iyo sida kooxdaada loo hogaamin doono loona habayn doono. Waa inay jirtaa hab adag oo lagu hubinayo inay jirto sinaan, kala duwanaansho iyo ka mid noqoshada kooxdaada oo dhan, oo ku dhex jirta nuxurka soo gudbinta iyo inta shaqadaada oo dhan. Kooxaha waxaa lagu dhiirigelinayaa inay ku daraan khibrado kala duwan oo naqshadeyn ah oo ay taageeraan oo ay iska kaashadaan dhinacyada naqshadeynta, tirakoobka iyo khibrada nolosha. Waa inaad sidoo kale tixgelisaa sidii aad ula shaqayn lahayd shakhsiyaadka maxaliga ah iyo ururada hal-abuurka leh kuwaas oo laga yaabo inay si toos ah aqoon u leeyihiin goobta iyo sifooyinkeeda gaarka ah.

6.2 Horumarinta soo jeedinta naqshadaynta ee xusuusta waxay u baahan doontaa dhowr xirfadood oo gaar ah waxaana kooxaha laga filayaa inay ku jiraan khibrada xirfadeed ee soo socota:

- Naqshadeeye Hogaamineed (la-taliyaha Nakhshad Hogaamiye ama Maamulaha Naqshadeeye)
- Naqshadeeye muuqaalka dhulka, taas oo ah shuruud lagama maarmaan ah.
- Injineerka, taas oo ah shuruud lagama maarmaan ah.
- Injineer Adeegyada Dhismaha iyo qaab-dhismeeyka
- La-taliyaha Hawlgelinta Bulshada
- Gaadiidka, Dhaqdhaqaaqa iyo La-taliyaha Helitaanka
- La-taliyaha Qorshaynta Magaalada

6.3 Waxa kale oo aad ka fikiri kartaa in lagu daro meelaha kale ee khibrada leh sida fanaaniinta, khabiirada iftiiminta, la taliyayaasha tarjumaada, beeralayda iyo maamulayaasha muuqaalka. Hadii kooxdaada la soo xulay oo lagu martiqaado inay u gudbaan wajiga labaad ee habka xulashada, ka dib jawaab celinta waxaad heli doontaa fursad aad ku darto oo aad nadiifiso xubinnimada kooxdaada hadii loo baahdo.

6.4 Habka xulashada caalamiga ah, kooxaha waa la hogaamin karaa waxaana ku jira shaqsiyaad ka kala yimid Boqortooyada Midowday (UK) iyo dibadaba. Hogaamiyaha kooxda nakhshaduhu waxa uu yeelan doonaa door udub dhexaad iyo isku dubarid habka naqshadaynta mustaqbalka, waa in uu leeyahay khibrad nashqad iyo keenid xoog leh iyo shahaado xirfadeed oo la aqoonsan yahay oo ka socda dalka ay ku sugan yihiin Boqortooyada Midowday tani waxay u badan tahay inay ku jirto xubinimada xirfadeed ee ururada sida Machadka Muuqaalka (Landscape Institute), Gudiga Diiwaangelinta Architects (Architects Registration Board) ama machadyada injineernimada ku haboon.

6.5 Gudiga Xusuusta Grenfell Tower waxay mar horeba ka helaan xoogaa taageero farsamo oo toos ah la-taliyayaal takhasus leh. Khibrada soo socota waxaa bixin doona Ministry of Housing, Communities and Local Government si ay u taageerto horumarinta iyo gaarsiinta xusuusta:

- La taliyaha dhaawaca
- La taliyaha kharashka iyo sahanka tirada
- Jootechnikal iyo la taliyaha fadaraynta dhulka
- waxtar leh iyo lataliyaha dheecaanka biyaha oogada
- La-taliyayaasha Beeraha iyo deegaanka
- Deegaanka la dhisay oo dheeraad ah iyo la-taliyayaal naqshadayn sida loo baahdo

6.6 Doorarkan waxaa si gaar ah u shaqaalaysiin doona Gudiga, oo ay taageerayso dawlada sida iyo marka loo baahdo. Si kastaba ha ahaatee, kooxaha naqshadeynta ayaa laga yaabaa inay doortaan inay ku daraan shaqsiyaad gaar ah iyo hay'ado leh xirfadahan oo qayb ka ah kooxdooda haddii ay rabaan.

**Habraacaaga wada shaqaynta**


6.7 Qaab-dhismeedka iyo tixraaca diiwaanka naqshadeynta ayaa noqon doona diirada ugu weyn ee gudbinta Wajiga 1. Midani waxay sidoo kale u baahan doontaa in la tixgaliyo sida kooxdu u wajihi doonto naqshadaynta goobta xusitaanka iyada oo la kaashanaysa Gudiga iyo bulshada Grenfell. Midani waa inay sidoo kale soo jiidataa shaqadii hore ee bixisa muujin cad oo ah hab loo wada dhan yahay oo bulshadu hogaaminayso si loo gaaro hindise naqshadeed ku dayasho leh.

6.8 Kooxaha waxaa lagu dhiirigalinayaa inay ururiyaan kooxo aqoon kala duwan leh, xirfad leh, xasaasi ah, iyo kooxo matalo. Habka waa inuu qeexaa sida ugu wanaagsan ee kooxda leh aqoonta kala duwan oo looga faa'iidaysan karo si loo abuuro xusuus ku haboon oo soo jiidasho leh oo ka tarjumaysa himilooyinka iyo ujeedooyinka naqshadaynta ee Gudiga. Soo jeedinta waxay u baahan doontaa in si xasaasi ah loo qaabeeyo oo farsamo ahaan la keeno.

6.9 Habka ka qaybgalka iyo naqshadaynta ka qaybqaadashada taas oo si buuxda u xisaabtanaysa macnaha guud, bulshada iyo dhaawaca wayn ayaa aad muhiim u ah. Asaas ahaan habraaca wuxuu u baahan doonaa in la hubiyo in qaabaynta iyo gudbinta xusuusta si toos ah loogu gaaray iyo kuwa guud ahaan bulshada Grenfell oo ay si buuxda ula xisaabtanto taageeridda ka qaybgalka balaaran ee bulshada ee la qabtay ilaa hada.

**Tusmada A1**

Qorshaha goobta Xusitaanka




**Tusmada A1:** sawirka hawada laga qaado ee goobta xusitaanka




Xogta khariirad u samaynta ee hawada laga qaaday: Copyright Bluesky International Ltd and Getmapping Ltd

**Appendix A3:** sawirka hawada laga qaaday ee goobta xusitaanka






Sawirka 1 ee goobta: Muuqaalka dhanka marinka lugaynta ee Station Walk ee isgoyska Bramley Road (06/07/23)





Sawirka 2 ee goobta: Muuqaalka xaga sare ee Station Walk ee goobta laga soo galo ee amaanka ah (06/07/23)




Sawirka 3 ee goobta: Muuqaalka bari dhanka goobta xusuusta ee hadda ku dhex jirta goobta ee amaanka ah (06/07/23)




Sawirka 4 ee goobta: Muuqaalka galbeedka qaybta bari ee goobta xusitaanka (06/07/23)



Sawirka 5 ee goobta: Adeega Wadada daboolay ee soohdinta koonfureed ee goobta xusuusta (06/07/23)




Sawirka 6 ee goobta: Grenfell Road ee dhanka albaabka laga soo galo ee amaanka (06/07/23)




Sawirka 7 ee goobta: Wadada dadka lugaynaya ee Kensington Aldridge Academy iyo Silchester Road (06/07/23)



Sawirka 8 ee goobta: Wadada dadka lugaynaya ee u dhexaysa Kensington Leisure Centre iyo Academy (06/07/23)



Sawirka 9 ee goobta: Albaabka Dadka lugeynaya ee ka imanaya koonfur bari ee Kensington Leisure Centre (06/07/23)



Sawirka 10 ee goobta: Wadada Dadka Lugaynayo Bomore Road ee Kensington Leisure Centre (06/07/23)



Sawirka 11 ee goobta: Qaybta Galbeedka ee Grenfell Walk iyo kaydinta (18/01/24)



Sawirka 12 ee goobta: Qaybta bari ee Grenfell Walk iyo kaydinta (18/01/24)